



## **LMBR. AMARKA SARE 20-07**

### **MAMNUUCIDDA KU ISTICMAALKA CUNTADA AMA SHARAABKA EE DHISMAHA IYO KULAMADA KA BADAN 25 QOF**

Maarso 8, 2020, waxaan soosaaray baaq xaalad degdeg ah anoo cuskanaya ORS 401.165 *et seq.* taasi oo ay ugu wacan tahay halista ku aaddan caafimaadka dadwaynaha ee caabuqa coronavirus (COVID-19).

Maarso 12, 2020, waxaan soosaaray Amar Sare oo Lambarkiisu yahay 20-05, oo mamnuucaya kulmada 250 qof ama ka badan gobolka oo dhan. Waxaan ku dhawaaqay xirnaansho gobolka oo dhan ah ee dugsiyada K-12 laga bilaabo Maarso 16, 2020, ilaa Maarso 31, 2020.

Maarso 13, 2020, Madaxwaynaha Maraykanka ayaa ku dhawaaqay in COVID-19 yahay xaalad degdeg ah oo qaran.

Maarso 16, 2020, Waaxda Adeegyada Aadanaha ayaa soo rogtay tallaabooyinkii ugu dambeeyey ee kahortag si ay u xadiddo booqdayaasha xarumaha daryeelka muddada dheer iyo xurmaha kale ee la deggan yahay. Maamulka Caafimaadka Oregon wuxuu ka qaaday tallaabooyin la mid ah Cusbitaalka Gobolka Oregon iyo xarumaha caafimaadka habdhaqan ee kale, wuxuuna xadiday ciddii la dhigayo Cusbitaalka Gobolka Oregon. Waaxda Oregon ee Xabsiyada way joojisay dhammaan booqashooyinka xabsiyada gobolka.

COVID-19 wuxuu keeni karaa cudur neefmareenka ku dhaca oo horseedaya xanuun halis ah ama dhimasho. World Health Organization (Ururka Caafimaadka Adduunku) wuxuu u tixgaliyey COVID-19 mid adduunka wada gaaray. COVID-19 wuxuu dadka isugu gudbaa qufaca, hindhisada, istaabashada, oo ay kujirto taabashada meel fayraska leh kadibna inaad taabato afka, sanko, ama indhaha.

Saraakiisha caafimaadka gobolka iyo deegaanku waxay sheegeen in fayrasku uu bulshada dhex wareegayo lana filayo in tirada uu haleelay kordhaan. Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurka (CDC) ee Maraykanka waxay sheegeen in COVID-19 uu aad u gudbo marka qofku astaamaha leeyahay, laakiin sidoo kale uu gudbi karo kahor astaamuhu inayna muuqan. CDC waxay ku talisay tallaabooyin si loo xadido faafidda cudurka ee bulshada, oo ay kujirto xadidaad dhacdooyinka iyo kulamada ah.

Tirada qiyaasta ah ama la xaqiijiyey ee kiisaska COVID-19 waxay sii waddaa inay korodho Oregon. Maarso 8, 2020, markii aan ku dhawaaqay xaalad degdeg ah, waxa jiray 14 kiis oo qiyaas ahaa ama la xaqiijiyey Oregon. Markii la gaaray Maarso 12, 2020, waxa jiray 21 kiis. Maantadan, waxa jira ugu yaraan 51 kiis iyo hal dhimasho.



**LMBR. AMARKA SARE 20-07  
BOGFGA LABAAD**

Si aan hoos ugu dhigo faafidda COVID-19, si aan u ilaaliyo dadka reer Oregon ee halista badan ugu jira inay qaadaan cudurka, iyo si aan u caawiyo inaanu jaahwareer ku dhicin awoodda qaadka ee daryeelka caafimaadka deegaanka iyo gobolka, waxaan taas u arkay in fulinta dhakhsaha ah ee kala fogaanta dadka iyo tallaabooyinka yaraynta ee bulshadu ay daruuri yihiin. Ujeedada Amarkan Sare waa in la yareeyo macaamilka tooska ah ee dadka iyadoo yoolku yahay xadidista gudbinta cudurka.

**HADDABA, WAXA AMAR IYO TILMAAN LAGU BIXINAYAA IN:**

La Mamnuucay In Cunto iyo Sharaab lagu Isticmaalo Dhismaha

1. Sida ay dhigayaan ORS 433.441(3)(a), (b), (d) iyo (f), ORS 401.168(1), iyo ORS 401.188(1)–(3), maqaayadaha cuntada, macmacaanlayaasha, taverns, brew pubs, meelaha khamriga wine-ka, meelaha shaaha, food courts-ka, tukaamada bunka, naadiyada, ama wixii la mid ah ee cunto ama sharaab laga helo waa inayna bixin ama oggolaan in cunto ama sharaab lagu isticmaalo dhismaha. Mamnuuciddani waxay khusaysaa gobolka oo dhan.
2. Meelahani waxay bixin karaan cunto ama sharaab aan dhismaha lagu isticmaalayn (tusaale, cunto safaari ama baabuur ku qaadis) ama in qofka loogu geeyo meeshiisa. Meelaha bixiya adeegyadan oo kale waa inay fuliyaan nidaamyada kala fogaanta dadka oo ah ugu yaraan saddex (3) fuudh oo u dhexeeya macaamiisha dalabka, sugitaanka, ama safka, si waafaqsan tilmaamaha Maamulka Caafimaadka Oregon. Meelahani sidoo kale waa inay fuliyaan nidaamyada kala fogaanta dadka oo kuwaas la mid ah marka la eego shaqaalaha, markasta oo ay suurtoagal tahay. Wixii ah iibin sharaab alkohool leh oo bannaanka dhismaha lagu isticmaalayo waa inay waafaqsan yihiin ORS baabka 471 iyo wixii xeer la hirgaliyey intaa kadib.
3. Baaragaraafka 1 ee Amarkan Sare ma khuseeyo xarumaha daryeelka caafimaadka, xarumaha daryeelka ilmaha, goobaha shaqada, dhismayaasha dawladda ee muhiimka ah, xarumaha jawaabta xaaladda degdegga ah ee daruuriga ah, barnaamijyada cuntada dugsiga ee daruuriga ah, iyo barnaamijyada hoyga iyo cuntada ee daruuriga ah ee u adeega dadka nugal. Meelahan oo kale waxa lagu dhiirigelinayaa isticmaalidda kala fogaanta dadka, jadwallo kala duwan, cunto qaadasho, iyo tallaabooyin kale oo la mid ah si loo yareeyo halista la xiriirta faafidda COVID-19.



**LMBR. AMARKA SARE 20-07  
BOGGA SADDEX**

Mamnuucidda Kulamada 25 Qof iyo Kabadan

4. Sida ay dhigayaan ORS 433.441(3)(a), (b), (d) iyo (f), ORS 401.168(1), iyo ORS 401.188(2), waxaan macnuucayaa kulamada bulshada, diiniga ah, iyo madadaalo ee 25 qof ama ka badan. Mamnuuciddani waxay khusaysaa gobolka oo dhan.
5. Kulamada uu khuseeyo Baaragaraaf 4 ee Amarkan Sare waxa kamid ah, laakiin aan ku koobnayn, wixii ah munaasabo ama hawlo bulsho, madani, dadwayne, raaxo, diin kusalaysan, iyo kuwa ciyaaraha, riwaayadaha, shirarka, qaadhaan ururinta, carwooyinka, xafladaha, iyo wixii la mid ah, hadii masaafad ah ugu yaraan saddex (3) aan la joogtayn karin.
6. Baaragaraafka 4 ee Amarkan Sare ma khuseeyo ganacsiyada iyo adeegyada daruuriga ah, oo ay kujiraan laakiin ku koobnayn, goobaha shaqada, tukaamada booshariga, tukaamada tafaariiqda, tukaamada hooohooyada, bangiyada iyo ururada daynta, kaalmaha shidaalka, huteelada ama arbeekooyinka, xarumaha daryeelka caafimaadka, farmasiyada, xarumaha daryeelka ilmaha, iyo dawlada gobolka ama hoose. Ma khuseeyo dugsiyada, kuwaasi oo ay jiraan amaro kale oo khsueeya oo la xiriira xirnaanshaha dugsiyada ee gobolka oo dhan. Ganacsiyada iyo adeegyada amarkan laga dhaafay waxa haddaba lagu dhiirigelinayaa inay fuliyaan nidaamyada kala fogaanta dadka, si waafaqsan tilmaamaha Maamulka Caafimaadka Oregon.
7. Amarka Sare ee Lambarkiisu yahay 20-05 (mamnuucidda kulamada waawayn) waa la buriyey, waxaana baddalay amarada Amarkan Sare.

Taariikhda Dhaqangalka iyo Fulinta

8. Amarkan Sare wuxuu dhaqangalayaa 5:00 g.d. ee Maarso 17, 2020, wuxuuna sii jirayaa ilaa Abriil 14, 2020, ilaa uu kordhiyo ama uu xilli hore soo afjaro Badhasaabku.
9. Amarkan Sare waa sharci caafimaadka dadwaynaha ah, sida ku cad ORS 431A.005, waana mid la hirgalin karo sida uu lagu oggolaaday ORS 431A.010. Sidoo kale, qofkii la helo isagoo ku xadgudbaya Amarkan Sare waxa la marinayaa ciqaabaha uu dhigayo ORS 401.990.



**LMBR. AMARKA SARE 20-07  
BOGGA AFAR**

10. Shakhsiyada iyo ganacsiyada waxa si aad ah loogu dhiigelinayaa inay ku dhaqmaan shuruudaha iyo qodobada Amarkan Sare, si fulinta sharcigu ay diiradda u saari karaan u adeegidda baahiyaha muhiimka ah ee bulshooyinkeena inta lagu jiro xaaladdan degdegga ah ee taagan.

Laga qabtay Portland Oregon maalintan 17<sup>ka</sup> Maarso, 2020.

---

Kate Brown  
BADHASAAB

CADDAYN:

---

Bev Clarno  
XOGHAYAHA ARRIMAHA DIBADDA